

Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda  
Jamhuuriyadda Somaliland

# DANJIRE



MARCH, 2020

Xogside Saddex Bilood ah



# Fariinta Hawlwadeenada Danjire

**Danjire waa xog-side sedex-biloodla ah, kaas oo ay soo saarto Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL. Waxaanu dadweynaha kula wadaagnaa wixii xog ah ee aanu muhiim u aragno, anagoo kusoo ururina wixii dhacdooyin ah ee la xidhiidha shaqada aanu u idmanahay.**



**Director**



**Deputy Director**



**Head of  
Promotion**



**Head of  
Production**



**Head of  
Customer Care**



**Head of Event  
Mgt. & Coordination**

**Wixii talo iyo toosin ah ee aanu ku horumarin karo xogsidahan iyo guud ahaanba shaqada Wasaaradda waxaad nagula wadaagi kartaan Email-ka Wasaaradda: [Info@slmof.org](mailto:Info@slmof.org) ama formka cabashada iyo talooyinka ee Website-ka W.H.Maaliyada [www.Slmof.org](http://www.Slmof.org).**

Follow & Subscribe us



# Tusmada Xogsidaha

1.	Wasiirka H. Maaliyadda JSL Oo Furay Kulan-Hawleed Lagu Lafo-Guray Doorka Agaasimayaasha Guud Iyo Guddoomiyayaasha Hay'adaha Dawladda Ee Nidaamka Maamulka Maaliyadda Dalka	1
2.	Madaxwaynaha JSL Iyo Guddoomiyaha Baanka Dhexe Oo Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda Ku Bogaadiyey Kor U Kaca Qiimaha Shiling-Ka Somaliland	3
3.	Wasiirka Horumarinta Maaliyadda JSL Oo Ardayda Jaamacadda Burco U Jeediyey Muxaadiro Dulucdeedu Ahayd 'Doorka Jaamacadaha JSL Ku Yeelan Karaan Horumarka Bulshadda'	7
4.	Wasiir Ku Xigeenka Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Oo Furay Kulan Hawleedka Qorshaha Fulinta Oodoroska Dakhli Ee Waaxda Cashuuraha Barriga Ee 2020-Ka	9
5.	Agaasimaha Guud Ee Wasaaradda Maaliyadda Oo Tababar U Furay Saraakiil Ka Tirsan Xafiiska Xisaabaadka Guud, Waaxaha Cashuuraha Barriga, Kastamada Iyo Cududa Shaqaalaha	11
6.	Buuga Xogsidaha Cashuuraha	12
7.	Shaqaalaha Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Ee Goboladda Iyo Degmooyinka Dalka Oo Lagu Tababaray Xeerka Anshaxa Shaqaalaha	14
8.	Hanti-Dhawraha Guud Oo Tababar U Furay Saraakiil Ka Kala Socotay Xafiiska Xisaabaadka Guud, Waaxda Baadhista Gudaha (Internal Audit) Iyo Hanti-Dhawr-Ka Guud Ee Dawladda	15
9.	Muwaadin Wax ka ogow noocyada tacrifadaha	16
10.	Ma Jirtaa II-Dhaqaale Oo Muddan In La Maalgashado Maanta Somaliland?	19
11.	Wax ka Baro Buuga Miisaniyadda Muwaadinka Somaliland 2020	21
12.	CASHUURTA LA REEBAYO (Withholding tax)	23
13.	Nuxurka Socdaal Shaqo Oo Wasiirka Iyo Agaasimaha Guud Ee Wasaaradda Maaliyadda Ku Tageen Xarumaha Dakhliga Ee Magaaladda Berbera	24
14.	Saamaynta Taban ee Caaquba Covid-19 ku Yeeshay Dhaqaalaha Dunida, Doorka Aqoonyahan-ka iyo Faa'idada Yagleelidii Ururka Dhaqaala-yahan ka Somaliland.	26



# Wasiirka H. Maaliyadda JSL Oo Furay Kulan-Hawleed Lagu Lafo-Guray Doorka Agaasimayaasha Guud Iyo Guddoomiyayaasha Hay'adaha Dawladda Ee Nidaamka Maamulka Maaliyadda Dalka





Hargeysa 28,03, 2020 (W.H.M) Wasiirka Horumarinta Maaliyadda JSL Dr Sacad Cali Shire ayaa 23, 02, 2020-ka daah-furay Kulana-hawleed mihiim ah oo loo qabtay agaasimayaasha Aguid iyo guddoomiyayaasha hay'adaha dawladda, kaas oo ka qabsoomay Royal Plaza ee Magaaladda Hargeisa. Kulana-hawleedkan ayaa lagu Lafo-guray doorka ay ku leeyihiin Nidaamka Maamulka Maaliyadda dalka, sida diyaarinta miisaaniyadda, dakhliga, dabagalka iyo isla-xisaabtanka iyo sidii ay door muuqda uga ciyaari lahaayeen nidaamka dib u habaynta maamulka maaliyadda ee PFM-ka. Sidoo kale waxa madashaasi ka hadlay oo tafaasiil ka bixiyey ujeedada iyo faa'idada kulankaasi Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda Somaliland Md Maxamed Cabdi Gurxan, waxa kale oo kulankaasi ka soo qaybgalay Wasiir ku xigeenka Wasaaradda horumarinta Maaliyadda Md Muuse Ibrahim Salaf iyo Xisaabiyaha Guud ee Qaranka Md Axmed Daauud Geedi iyo Agaasimayaasha Waaxaha Kala duwan ee Wasaaradda Maaliyadda ee uu kulankaasi khuseeyo, kuwaas oo dhamaantood soo bandhigay warbixino ku taxaluqa faa'idada nidaamka casriga ee PFM-ka. Ugu horayna waxaa halkaasi ka hadalay Agaasimaha guud ee wasaarada horumarinta maaliyadda Maxamed Cabdi Gurax oo sharaxaad ka bixiyey faa'idada uu kulankaas leeyahay, waxaana hadaladiisii ka mid ahaa "Waxaa aynu isla eegi doonaa doorka uu Agaasimayaasha guud iyo guddoomiyaasha hay'adaha madax banaani ku leeyihiin tayeynta nidaamka maamulka maaliyada ee qaranka, waynu ognahayoo masuuliyada koobaad nidaamka sharciga maaliyada waxaa uu saarayaa agaasimayaa-

sha guud iyo guddoomiyayaasha hay'adaha madaxbanaan, markaa masuuliyadii aynu awalba hayney ee sharcigu inagu jideeyey oo runtii faahfaahin dheerad ah wasaaradda maaliyadu ay ka samaysay dhinac xeernidaamiyaha iyo hagayaasha-ba, waxa aynu isugu nimi uun sidii aynu u sii tayeyn lahayn nidaamka maaliyadda ee agaasimayaasha saaran iyo guddoomiyayaasha hay'adaha madax banaan, gaar ahaan masuuliyada maaliyadeed ee inaga wada saaran nidaamka dakhli soo saarka, kharash galida, la xisaabtanka iyo guud ahaan hanaanka baadhista iyo isla xisaabtanka guud ee maaliyadeed ee dawladda ayaa aynu si qoto dheer u dulistaagi doonaa, ujeedada maxsuulka aynu ka rabnaa waxaa ay tahay dawladda aynu waxaa ay awood u heli doontaa in maalka ay isticimaalayso ee masuuliyada koobaad inaga saarantahay in ay inoo soo saarto adeeg dawladeed oo shacabkeena aynu ku raaligalino sidoo kale in aynu fulino mashaariic wax ku ool ah oo hanaanka loo maray ay ka muuqato hufnaan iyo tayo wanaagsani". Wasiirka horumarinta maaliyada Dr Sacad Cali Shire oo isagu kulankaasi oo socday mudo hal maalin ah isla markaana si rasmi ah u daahfuray, waxaana hadaladiisii ka mid ahaa "Qaranka mishiinka wada ee uu ku socdaa ee xilku ka saaran yahay fulinta hawlaha loo igmaday waa idinka, marka ay timaado xilka fulinta wasaaradda ama hay'adda idinka ayaa ka mudan wasiirada, wasiirku inta badan wuxuu hayaa xil siyaasadeed hogaamin laakin fulin markay timaado cida fulinaysaa waa idinka, markaa waxaad tihiin xubno aad iyo aad u mihiim ah oo qarankana u mihiim ah dawladda u mihiim ah, waxaan doonayaa inaan sidaa idiin xusuusiyo, waxaad qaranka uga masuul tihiin maaraynta dad iyo duunyo,

hantida ma guurtaa, shaqaale iyo maaliyad intaas ayaad masuul uga tihiin waliba gaar ahaan waxaa maanta halkan aynu isugu nimi masuuliyada idinka saaran qaybta maamulka maaliyadu wuxuunbu la mid yahay maamulka khayraadka kale, wuxuu ka bilaabmayaa waa qorshe waxaa ku xigayaa waa fulintii waxaa ku xigaa waa xisaab celintii iyo ka warbixintii, inagu waxa aynu qaadanay nidaamka dib u habaynta maamulka maaliyada ee PFM, maanta waxaa aynu isugu nimi doorka aad ku leedihiin marxaladaha wareegsan ee maamulka maaliyadda, waxa aynu nidaamkan u qaadanay waa nidaam aynu isleenahay wuxuu idin suurogalinayaa in aynu helno hab tayo leh oo dahfuran oo la xisaabtan leh oo kalsooni abuurikara, kaas sidii aynu u dhaqangalin lahayn ayaa aynu doonaynaa maanta idinka wixii xil ah ee si gaar ah idin saaran in aynu istusaalayno". Ugu danbayntina waxaa kulankaas soo xidhay wasiir ku xigeenka wasaarada horumarinta maaliyada mudane Muuse Ibrahim Salaf, isaga oo halkaas kula dardaarmay agaasimayaasha guud iyo guddoomiyayaasha hay'adaha madaxbanaan, uguna mahad celiyey sida fiican ee ay uga soo qaybgaleen kulankan iyo waliba sida fiican ee ay afkaartooda uga dhiibteen kulankaasi.

## **Madaxwaynaha JSL Iyo Guddoomiyaha Baanka Dhexe Oo Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda Ku Bogaadiyey Kor U Kaca Qiimaha Shiling-Ka Somaliland**

**“Waxaan Aad Ugu Mahad Celinayaa Wasiirka Maaliyadda Waayo Aqoon Badan Buu U Lahaa Samir Badana Wuu Ku Daray, Qoloda Baanka Iyo Shaqalihiiisu Waa La Mid Iyana”Madaxwayne Biixi**

**“Wasiirka Maaliyadda Waxa Uu Xakameeyey Lacagtii Iska Bixi Jirtey Oo Imi-ka Wax Aan Miisaaniyadda Ku Jirin Ma Saxeexo, Annaguna Baanka Haddaanu Nahay...”Guddoomiye Baqdaadi**



Hargeysa, 28,03, 2020 - (W.H.M) - Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland, Mudane Muuse Biixi Cabdi ayaa 8 March 2020-ka kulan la qaatay hoggaanka sare ee ururka sarriflayaasha Somaliland ee WADA-JIR, iyadoo kulankaas oo ka qabsoomay qasriga madaxtooyadda ay ka qaybgaleen Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda, Dr. Sacad Cali

Shire, Guddoomiyaha Baanka dhexe, Mudane Cali Ibraahim Baqdaadi iyo hogaanka ururkaasi. Sidoo kale Madaxwaynaha JSL ayaa Wasaaradda horumarinta maaliyadda Somaliland ku bogaadiyey kor u kaca qiimaha lacagta Somaliland, isagoo sidoo kale Madaxwayne Biixi hoos u dhaca lacagta doollarka iyo kor u kaca lacagta qaranka iyagana kaa-

lintooda ku ammaanay Baanka dhexe, Xisaabaadka guud iyo ururka sariflayaashaba, kuwaas oo uu kula dardaarmay inay wada-shaqaynta dhexdooda sii xoojiyaan si qiimaha lacagta Somaliland sare loogu sii qaado.







Dhinaca kale Guddoomiyaha Baanka dhexe ee Somaliland Cali Ibraahim Baqdaadi ayaa Wasiirka horumarinta maaliyadda Dr Sacad Cali Shire ku ammaanay kaalintiisa sare u qaadista shilinka Somaliland, kaas oo tibaaxay inay sabab u tahay guushaasi siyaasada guud ee xukuumadda uu hogaaminayo Madaxwayne Muuse Biixi Cabdi oo ay ka go'an tahay in qiimaha lacagta dalka sare loo qaado. Guddoomiyihii hore ee ururka sarriflayaasha Somaliland ee WADA-JIR, Mudane Axmed Xasan Mataan (Awliyo) iyo guddoomiyaha cusub, Mudane Barkhad Axmed Coofiye oo ugu horrayn kulanka ka hadlay, ayaa iyaguna xukuumadda Somaliland ku ammaanay siyaasada ay u dajisay si ay qiimo u yeelato lacagta dalku.

Ugu horayna Guddoomiyaha Baanka Dhexe ee Somaliland Md Cali Ibraahim Baqdaadi oo sharaxaad ka bixinaya sare u kaca ku yimid lacagta dalka, waxa hadaladiisii ka mid ahaa "Madaxwayne saan hore u sheegayba sarriflayashu waxa weeyaan qaybta ugu muhiimsan ee dhaqaalaha dalka Somaliland ee gacanta ku haysa, sarifku haduu is badalo ama baaxo dago khalkhal wayn ayaa galaya dhaqaalaha oo qofkii maanta wax soo ibsada ee ganacsada ahaa hadii aanu sarifku daganayn barito wuxuu ku iibinayo iyo waxa uu macaashayo kala garan maayo, markaa qayb wayn ayey ka qaadataa dagaanshaha sarifku kobaca dhaqaalaha, sarifkaana waxa gacanta noogu haya sariflayaasha weeye oo caawa halkan wada fadhiya .

Anagu ka baan ahaan iyagaan la shaqaynaa oo iyagaan leenahay wada shaqayn wanaagsan oo team dhan oo halkan fadhiya ayaa jira oo baanka ka tirsan laakiinse sidaan xafladi ka sheegay maalin dhaweeto

sarifku iskamuu dagin ee waxba dajiyey. marka khudradii aan ka keeni lahayn koonfur Somalia ama Ethiopia ama dalalka kale, inaga isku filnaanay, iyo beerihii oo inoo go'ay wajaale iyo Xaaxi iyo beer oo dawladu inoo beertay oo madaxwaynuhu ku balan qaaday ololihisii in sicir bararka laga bixi karo inaynu inagu isku filnaano oo beeraheenu aynu beerano , taasina talaabo wayn bay inoo ahayd oo qayb wayn ka qaadatay dajinta sarifka iyo dawladda oo yaduna kharashaadkii saayidka ahaa ee aan ku jirin miisaaniyadda bixi jiray joojisay oo uu ugu horeeyo wasiir maaliyadda oo inala fadhiya oo xakameeyey lacagta iska bixi jirtay ee la bixin jiray awalba, imanka lacag aan ku jirin miisaaniyadda wasiirku ma saxeexo , runti wasiirka ayaa isna qayb wayn ka qaatay dajinta sarifka".

Waxa kale oo isaguna halkaas ka hadlay Wasiirka Horumarinta Maaliyadda Dr Sacad Cali Shire oo si qoto dheer uga hadlay sababaha ka danbeeya guusha kor u qaadista qiimaha shilinka Somaliland, waxaana hadalkiisa ka mid ahaa "Mudane Madaxwayne qaybaha dhaqaalaha ee qaranka kuwa ugu muhiimsan waxa ka mid ah qaybta maaliyadda, qaybta maaliyadda afar tiir ayey leedahay Somaliland, waa tiirka bankiga dhexe iyo bangiyadda gaar loo leeyahay iyo tiirka xawaaladaha iyo tiirka sariflayaasha, inta kale soo raacda caymisku ku jiraan way inagu cusbyihiin oo way yaryaryihiin, afarta tiir marka ay timaado sarifka waxaynu dooran karna waxa ugu muhiimsan sariflayaasha, waayo sadexda kale iyagay ka qaataan sarifka subixii, marka dagaanshaha sarifka qayb ayey ka yihiin. Madaxwayne sarifku halka uu marayo waxay ku xidhantahay dalka lacagtiisa iyo suuq soo galinta lacagta, labadaasay ku xidhan

tahay, amba demand iyo supply, labadaasey ku xidhan tahay, marka uu dalabku bato lacagteenu ee loo baahdo khaasatan marka aynu wax dibada ka ibinayno ee ay dadka kale u baahdaan kor bay qiimaha lacagteenu u kacaysaa, marka dalabka lacagteenu yaraadona qiimaha lacagteenu hoos buu u dhacayaa, waxyaabaha keenay in qiimaha lacagteenu kor ukaco waxa ka mid ahayd siyaasadaadii madaxwayne oo ahayd in aan electronic lagu dirin \$100 wax ka yar, taasi runtii wax wayn ayey badashay, oo iyadoo shilinkii laga tagayba ayaa waxay dhalisay in iminka baahi wayn loo qabo shilinkii".

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland, Mudane Muuse Biixi Cabdi oo ugu danbayn halkaasi ka hadlay ayaa ugu horrayn xubnaha sarriflayaasha ah kula dardaarmay in waayo aragnimada iyo khibradda dheer ee ay hayaan uga faa'iideeyaan bulshadooda, kana dhigaan dhaxal ay manaafacaadsadaan jilalka dambe ee dhalan doonaa. Waxaanu madaxwaynuhu hadalkiisa ku bilaabay "Iminka khubaraa tihiin, waayo-aragnimadiina waa loo baahanyahay, waayo aduunku waxa hore u maraa qofku dhibaataada uu soo maro ayuu qorfka ka danbeeyanaa uu ka baydhaa oo jarka aad ka dhacday inankaagu ama ubadkaagu inuu ka dhaco maaha isna , inagu inta badan wax ma qorno saasaynu hadana nin wax qoray dhagaysanin, waxa laga yaaba maanta in dhalinyardeena suuqa Hargeisa jooqta ee jaamacadaha ka baxay hadaad waydiiso meel heblaayo halKay ku taala waxa laga yaaba inuu Google-ka ka eego, waayo aabihiina uma



sheegin awoowgiina uma sheegin, waynu iska soconay uun. Marka waxaan leeyahay maanta anaaba daris idinka bartay , hawshaas aad soo marten ilaayo 1995-kii wakhti yar maaha oo waa PHD, inaad inoo qortaan ayaa fiican oo aad inoo dajisaan hadhaw oo aad ka mid noqotaan haday dhibaato timaado ama dhaqaalo xumo ay timaado wakhti kaasta, sidoo kale hadii ay inoo qori lahaayeen awoowayaasheen sida aynu u noolayn ee aan iskugu filnayn nolosheena, haday maanta inoo qori lahaayeen dhibaatooyin badan iyo warwar badan namoo hayeen, hadii xoolo dhaqato tahay iyo hadii ay dhul tahay, hadii ay tahay sida loo kala baxo hadii muran dhaco ama lays qabsado, waxay ila tahay hadaynu teena qori lahayn inaynu hore u kori lahayn oo mashaakil badan iminka-na haysta waynu ka bixi lahayn, waayo wax kaasta oo dhaca

waxaynu akhrisanaa nin wixiisa qorta oo aabihii ka dhaxlay, marka waxay ila tahay si aynu u noolaan karno oo caruurteena dhaxal uga tagno waxaynu hayna oo hantida ah qof kaasta intuu yiqaano qofka kale ha baro. iminka 30 sano nalama ictiraafsana hadana amaankeena iyo dhaqaaleheena waynu wadnaa, waa Ilaahey mahadi laakin hadii aan isasii dhexgalno oo aynu is waraysano nin walba hawshuu hayo ka kale oo nin walba dhibaataada u gaarka ah hadii ka kale uu ka waraysto waxbaynu wada qabsan lahayn, taasaan ku dhiirinayaa”. Madaxwayne Biixi isagoo hadalkiisa sii wata, waxa uu intaas raaciyey “Arintan sarifka ee aad ka hadasheen aad iyo aad ayaan idinka mahad celinayaa, hawshaa aad haysaan ee qaranka u haysaan, inta badan aniga waad i amaantaan sarifka dagay dartii laakin run ahaantii waxa

amaanta iska leh Wasaarada Maaliyadda iyo baank iyo xisaabaad guud iyagaa doorka ugu wayn ka qaatay sarifka dajintiisa, iyagaana hawshaas ka soo baxay , waliba waxaan aad ugu mahad celinayaa Wasiirka maaliyadda waayo aqoon badan buu u lahaa samir badana wuu ku daray, qoloda baanka iyo shaqalihiiisu waa la mid iyana, niman kaasaa aqoonta iska leh iyagaana laga waraysanayaa”. Ugu dambayntii ururka sarriflayaasha Somaliland ee WADA-JIR, waxa ay shahaado-sharaf ay kaga mahadcelinayaan kaalintii ay ka qaateen kor u qaadista shilinka Somaliland ku maamuuseen madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland, wasiirka wasaaradda horumarinta iyo guddoomiyaha Baanka dhexe ee Jamhuuriyadda Somaliland.



## Wasiirka Horumarinta Maaliyadda JSL Oo Ardayda Jaamacadda Burco U Jeediyey Muxaadiro Dulucdeedu Ahayd ‘Doorarka Jaamacadaha JSL Ku Yeelan Karaan Horumarka Bulshadda’



**B**urco 28,03,2020 (W.H.M) – Wasiirka Wasaarada Horumarinta Maaliyadda JSL Dr. Sacad Cali Shire ayaa ardayda jaamacadda Burco wax ka barata u jeediyey muxaadiro dulucdeedu ahayd door noocee ah ayey Jaamacadaha Somaliland ku yeelan karaan horumarka bulshadda. Munaasibada uu Wasiirku muxaadirada ugu jeediyey ardayda oo habeenimadii 15 March 2020 ka qabsoontay hoolka Jaamacadda ayaa ahayd mid si qurux badan loo soo agaasimay, isla markaana waxa goob jog ka ahaa gudoomiyahay jamacda Burco Ciise Nuur Liibaan, guddida boodhka jamacadaasi, macalimiin iyo boqolaal ka mid ah ardayda wax ka barata Jaamacaddaasi. Dr Sacad Cali Shire oo ugu

horayn ka hadlay madashaasi ayaa si qoto-dheer u sharaxay qaabka ay jamacaduhu uga qaybqaadan karaan horumarinta mujtamacooda. Ugu horayna waxa uu hadalkiisa ku bilaabay “Idinku ardaydii jaamacadaad u badantihiin, waxa aynu is waydiinaynaa jaamacaduhu sideebay door uga qaadataan horumarka bulshadda, sidee baynu dadkeena ugu samaynaa guryo ku haboon binu-aadamku inuu ku noolaado oo ku filan oo mucidaadkii looga baahnaa leh, laydhkii leh, biyihii leh oo internetkii leh, sidee baynu bulshadeena ugu samaynaa oo isla markaas marka aynu dadkeena miyiga laga hadlayo oo marka loo baahdo la laalaabi karo oo awr la saari karo, waa xal inaga la inoga baahan yahay. Xaga caafimaadka laftarkiisa dhibaa-

tooyin badan ayaa jira amaba ha ahaadaan waxyaaba hore aynaan u aqoonin sida cudurkan kaduudiyaha oo ah runtii cudur inagu cusub, waa inaynu is waydiinaa muxuu yahay cudurkani? muxuu ka dhashaa? sidee buu u fidaa? sidee loo kala qaadaa? sidee baynu u xakamaynaa? Sideebaynu u dawaynaa? Markaa waxa weeyi xalkii inagaa la inaga rabaa jaamacad ahaan. Waxa laga yaabaa in 50% biyaha qasabaduhu aanay guryaheena gaadhin Burco hadii aanay ka badnaynba, meelaha miyiga ah ama tuulooyinka biyo qasabadeed ma jiraan oo baraago ayuun baa jira, laakiin roobka aynu helnaa inkaastoo uu yahay ilaa 300 millimeter sanadkii oo



aanu badnayn, hadana marka aad u badasho guud ahaan biyaha aynu helno sanadkii way badan yihiin, waxa laga yaabaa inaynu sanadkii helno wadan ahaan ilaa 3 bilyan oo mitirkuyuub, markaa waxa la inaga doonayaa inaynu ka shaqayno sidii aynu u kaysan lahayn ee aynu uga faa'idaysan lahayn waa arin u baahan cilmi-baadhis, hadaba si ardayda loo abaabulo oo loo garto doorka ay ardaydu arimahaasi ka qaadan karto, dabcan waxa loo baahan yahay inay jaamacadu ka saacido ama ka caawiso ardayda”.

Dr Sacad Cali Shire wasiirka horumarinta maaliyadda JSL isagoo hadalkiisa sii wata, waxa uu intaas raaciyey “Waxyaabaha haddii aanay jirin aan ku talin lahaa waxa ka mid ah in Jaamacadda Curric-

ulum lagu daro Faculty walba in ardayda soo gashaa ay saacado go’an ay si muca’yim ah ay bulshadda ugu shaqayso si tabaruc ah, hadii la yidhaahdo ardaygu ma qalin jabinayo ilaa uu 100 saacadood oo tabaruc ah bulshadiisa u shaqeeyo. Waxa fiican markaa in ardayda loo sameeyo xafiis ka caawiya sidii ay u samaysan lahaayeen ururo xirfadlayaal ah ama naaddiyo oo xafiisyadoodu jiraan oo ardaydu ay tagi karaan ama laga saacidi karro waxay u baahan yihiin ardaydu ama tallo laga siin karo waxa ay u baahan yihiin. Waynu ognahay jaamacada dhaqaalaheedu wuu kooban yahay oo cilmi-baadhisahaas oo kale waxay u baahan tahay in gacan laga siiyo oo dawladda gacan ka siiso, aduunyada hay’ado badan baa jira oo taageero ka gaysta arri-

mahaasi, waxaanay noqon doontaa faa’ido dalkeena oo kaliya aanu helayne cid badan anfic doona”. Dhinaca kale macalimiinta iyo ardayda Jaamacadda Burco ayaa halkaasi uga mahadnaqay Wasiirka Horumarinta Maaliyadda Somaliland Dr Sacad Cali Shire, kaas oo ay ku amaaneen dadaalada uu inta badan galiyo aqoonta iyo horumarka dalkaba, kuwaas oo sidoo kale talooyin badan usoo jeediyey wasiirka, isla markaana tibaaxay cabaqabo badan oo ku gadaaman inay ardaydu door muuqda ka ardaydu ka ciyaarto horumarka dalka iyo cilmi-baadhisaha qaranka mihiimka u ah.



## Wasiir Ku Xigeenka Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Oo Furay Kulan Hawleedka Qorshaha Fulinta Odoroska Dakhli Ee Waaxda Cashuuraha Barriga Ee 2020-Ka



Hargeisa, 28,03,2020(WHM) H- Wasiir Ku Xigeenka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda Md Muuse Ibraahin Yuusuf (Salaf) ayaa maanta si rasmi ah u furay Kulan hawleedka qorshaha Fulinta odoroska Dakhli ee Waaxda Cashuuraha Barriga ee 2020-ka, iyadoo Hotelka Baraar ee Magaaladda Hargeisa Kulan Balaadhan loogu u qabtay 16-kii January ee sanadkan Masuuliyiinta Cashuuraha barriga ee gobolada iyo degmooyinka dalka. Munaasibadaasi oo ahayd mid si heersare ah loo soo Agaasime ayaa waxa kale oo ka hadlay Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda Md

Maxamed Cabdi Gurxan, Agaasimaha Waaxda Cashuuraha Bariga, Cabdisalaan Maxamuud Maxamed, Agaasime ku xigeenka Cashuuraha Barriga Khadar Maxamed Muxumed (Kh. Laas), Agaasimaha Waaxda Xidhiidhka Dadwaynaha Iyo Xogta Axmed Muuse Maxanuud, Agaasime ku xigeenka Waaxda Iibka Axmed Ismaaciil Maxamed iyo Masuuliyiin kale oo ka socday Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda, kuwaas oo dhamaantood halkaasi ka jeediyey hadalo mahadnaq iyo dhiirigalin iskugu jira, iyadoo kulankaasi ahaa mid lagu dardargalinayo Qorshaha shaqo ee sanadka 2020-ka. Dhinaca kale Madaxda Wasaaradda

Horumarinta Maaliyadda ayaa Saraakiishaasi Cashuuraha Barriga uga mahadnaqay dadaalkii ay sameeyeen Sanadkii hore maadaama oo Dakhligii Miisaaniyaddii 2019-kii ay Qorshihii Ku tala-galka ahaa ka batay 5%. Waxaana si wada jira lagu dhiirgaliyey Masuuliyiinta Cashuuraha Barriga inay ku dadaalaan oo ay uga hawlgalaan sidii ku tala galka dakhliga 2020-ka dadaal loogu gali lahaa sidii uu usoo xaroon lahaa. Ugudanbayn waxamadashaasi lagu qaybiyey Buuga Miisaaniyadda Muwaadinka oo loogu tallo-galay inay gaadhsiiyaan gobolada iyo degmooyinka ay ka kala yimaadeen.







## Agaasimaha Guud Ee Wasaaradda Maaliyadda Oo Tababar U Furay Saraakiil Ka Tirsan Xafiiska Xisaabaadka Guud, Waaxaha Cashuuraha Berriga, Kastamada Iyo Cududa Shaqaalaha



Hargeysa 28,03, 2020 (WHM) Agaasimaha guud ee wasaarada horumarinta maaliyadda Somaliland Md Maxamed Cabdi Gurxan ayaa 01/03/2020-kii saraakiil kala tirsan Xafiiska xisaabaadka guud, waaxaha Cashuuraha berriga, Kastamada iyo cududa shaqaalaha ee wasaarada horumarinta maaliyada u furay tababar ku saabsan qorshaha qiimaynta waxqabadka shaqaalaha ama shaqo gudashada shaqaalaha.

Agaasimaha guud ee wasaaradda horumarinta Maaliyadda Maxamed Cabdi Gurxan oo halkaasi ugu horayn ka hadlay ayaa si qotodheer uga warbixiyey mihiimada uu tababarkaasi u leeyahay waaxaha ka qaybgalay, waxaanu hadalkiisii ku bilaabay “Waxaanu agaasime waaxda kaste ka codsanaynaa markuu helo qorshaha, qeexitaanka shaqada, habka loo qiimaynayo shaqada inaad shaqada ka dhaqajisaan

xafiisyadiina, inaad masuuliyada sii libinlaabtaan, in aanay shaqadu ku xidhnaa agaasime waaxeed, in aanay shaqadu ku xidhnaan agaasime guud, in aanay shaqadu ku xidhnaan wasiir ee shaqadu ay dhaqaaqdo oo ay si xilkasnimo leh ay u dhaqaaqdo, bil walbana warbixinteen qiimaynta aynu kala qaadano tababarada noocan oo kale ahina ay noqdaan kuwo wax idiin tara oo aqoon laga korodhsado”.

Agaasimaha guud ee wasaarada maaliyada Maxamed Cabdi Gurax waxa uu shaqaalaha kula dardar-may in maadaama ay wakhti iska soo jareen in ay si fiican ugu faa’iidaystaan tababarkan mudada ay joogaan halkan ee ay qaadayaan tababarkan qiimaynta shaqaalaha, xilna ay iska saaraan shaqada oo ay ku dhabqaan aqoonta ay halkan ka bartaan isla markaana ay u sii gudbiyaan shaqaalaha kale ee aan helin tababar noocan oo kale ah. Ugu danbaynta waxaa halkaasi

ka hadlay Agaasimaha waaxda Cududa Shaqaalaha ee wasaaradda horumarinta maaliyadda Md Maxamed Axmed Wayrax, isaga oo ka waramay waxyaabaha uu tababarkani ku saabsan yahay iyo faaiidooyinka uu u leeyahay dhamaanba shaqaala waynaha wasaarada horumarinta maaliyada, waxaana uu agaasimaha waaxda shaqaalhu ku guubaabiyey saraakiishi tababarka qaadana-yay ee ka kala socday waaxyaha kala duwan ee wasaarada horumarinta maaliyada in marka tababarku u dhamaado looga baahanyahay in ay waax ku qiimeeyaan aqoonta ay halkan ku qaateen oo loogu talagalay in lagu qiimeeyo dhamaan shaqaalaha wasaarada kuna dabaqaan baahida shaqo ee xafiisyadii ay ka kala yimadeen, waxna kaga bedelaan shaqda xafiisyada oo ay shaqda ay qabanayaan noqoto mid ku dhisan aqoon iyo xirfad.



# Buuga Xogsidaha Cashuuraha

## FARIINTA 01

### Wasiirka Wasaarada H/Maaliyada

Ugu horayn waxa mahad oo dhan iska leh ALLAH ina-siiyay dhaman nimcooyinka kala duwan ee aynu haysano oo aan tiro lagu koobi Karin. inoona suurta galiyay in aynu dhamysytirno **“Buugga Xogsidaha Cashuur Bixiyaha”** ee waaxda cashuuraha berriga.

Marka labaad waxaan aad ugu faraxsanay in uu dhammaystirmey buugga tacriifadaha cashuuraha berriga oo koobsanaya dhamaan tacriifadaha kala duwan ee ay ku hawl galaan xafiisyada cashuuraha berrigu, buuggani waxa uu si nidaamsan oo hufan u tusayaa shaqaalaha cashuuraha berriga ee u idman dakhli ururintu inay ka helaan xogta iyo tilmaanta ay ubaahdaan ee ku saabsan cashuuraha kala duwan ee ay ka soo ururiyaan cashuur bixiyayasha ay ku waajibtay cashuurtu.

Hadda ba ujeedada ugu weyn ee **buugga xogsidaha cashuur bixiyaha** uu xambaarsanyay waxa ay tahay “in ay helaan cashuur bixiyayaashu xog si ay u ogaadaan ama u hubiyaan xaddiga ama nooca cashuureed ee ju wajibtay.”

Sidaa darteed waxa hada kadib u fududaan doonta cashuur bixiyaha inuu fahmo nooc kasta oo cashuureed oo looga baahan yahay iyo xadigeedaba oo si waafi ah uga muuqata **buugga xogsidaha cashuur bixiyaha**.

Ugu danbayn , buugani waxa uu faa'iido weyn u leeyahay nidaamka iyo hufnaanta adeega dakhli Ururinta ee waaxda cashuuraha berrigu ugu xilsaarantay Wasaarada H/Maaliyadu iyada oo u qayb weyn ka tari doono in cashuur bixiyaha aanay wakhti badan ka qaadaan hubinta iyo helida nooca ama xaddiga cashuureed ee ay bixinayaan. Sidoo kale waxa uu guud ahaan cashuur bixiyaha ka caawianaya barashada ilaha kala duwan ee uu kaga waajibi karo dakhli ama cashuur.

Wasiirka Wasaarada H/Maaliyada  
Dr. Sacad Cali Shire

## 02 XOGSIDAHA CASHUUR BIXIYAHA

## CUTUBKA 1aad MABAA'DIDA GUUD EE CASHUURAH

**1. Waa maxay cashuurtu?**

Cashuurtu waa qaadhaan khasab ah oo dawladdu ugu **waajibisay** si sharci ah dadkeeda, sida qofka shaqsiga ah, shirkad iyo wax-is-dhaafsi kasta oo dhaca taas oo ay ugu talo-gashay in ay ku fuliso hawl-maalmeedkeeda ay dawladdu u qabato shacabkeeda, sida arrimaha bulshada, nabad-gelyada, caddaaladda, caafimaadka, iyo waxbarashada, IWM.

**2. Qaybaha cashuurta**

Guud ahaan, cashuurtu waxa ay u qaybsantaa laba qaybood oo kala ah, Cashuur Toosan iyo Cashuur Dadban.

**3. Maxay yihiin xeerarka cashuuruhu?**

Waxa ay kala yihiin sidan soo socota:

**1.** Xeerka Dakhliga Cashuuraha Berriga Xeer Lr. 72/2016, waxaannu ka kooban yahay lix cutub oo kala ah:

- a. Cutubka 1aad Qoddobo Guud
- b. Cutubka 2aad cashuurta dakhliga
- c. Cutubka 3aad Badeecadda iyo Adeega
- d. Cutubka 4aad Cashuurta Xakamaynta (excise tax)
- e. Cutubka 5aad Haayadda Dakhliga
- f. Cutubka 6aad Guddiga Dacwadaha Cashuuraha
- g. Iyo Siddeed lifaaq.

**2.** Lifaaqa toddobaad ee Xeerka dakhligu waxa kale oo uu sheegay xeerarka lagu maamulayo cashuuraha waana sidan:

- a. Xeerka Kastamada
- b. Xeerka Cashuuraha Moorka (Stamp Duty Tax)
- c. Xeerka Waddo-Marista iyo nabad-gelyada wada Marista
- d. Xeerka Diwaan gelinta
- e. Dhammaan Dakhliyada Cashuuraha iyo kuwa

**La socio.....**



## Shaqaalaha Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Ee Goboladda Iyo Degmooyinka Dalka Oo Lagu Tababaray Xeerka Anshaxa Shaqaalaha



**B**erbera 28,03,2020 (WHM) Agaasimayaasha Waaxaha Cududa Shaqaalaha Md Maxamed Axmed Wayrax iyo Adeegyada Sharciga Marwo Hibaaq Guuleed oo ay weheliyaan Madaxda Maaliyadda ee Gobolka Saaxil, ayaa daahfuray tababar shaqaalaha Wasaaradda ee Gobolka Saaxil, tababarka ayaa ku saabsanaa barashada Xeerka Anshaxa Shaqaalaha. Waxa sidoo kale gobolada iyo de-

gmooyinka dalka oo dhan loo kala diraytababarayaal bixiyatababarka. Sida aanu hore idiinla wadaagnayba Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL waxay mudnaanta siinaysaa sanadkan 2020-ka tayeenta shaqada, shaqaalaha iyo isla-xisaabtanka, hadaba iyadoo taa ka duulaysa waxay wasaaradu dajisay xeerka anshaxa shaqaalaha. Xeerkan ayey waaxda adeegyada sharci ee wasaaradu kasoo xigatay xeerka guud ee shaqaala-

ha dawlada x.l.r. 7/1997, xeerka maamulka iyo maaliyadda x.l.r. 75/2006 iyo xeerka kala-jidaynta hay'adaha dawladda x.l.r. 1/2018. Xeerkan ayaa wax weyn ka badeli doona habsami u socodka shaqada ee Wasaaradda horumarinta maaliyadda Jamhuuriyadda Somaliland.

# Hanti-Dhawraha Guud Oo Tababar U Furay Saraakiil Ka Kala Socotay Xafiiska Xisaabaadka Guud, Waaxda Baadhista Gudaha (Internal Audit) Iyo Hanti-Dhawr-Ka Guud Ee Dawladda



Hargeysa 28,03,2020( W.H.M) Hantidhawraha Guud ee Qaranka Somaliland Mudane Axmed Yuusuf Dirir ayaa 20/1/2020 tabarar u furay hawl-wadeeno ka kala socday Xafiiska Xisaabaadka Guud, waaxda baadhista gudaha ee Wasaaradda Maaliyadda iyo Xafiiska Hanti dhawrka Guud ee Qaranka, tababarkaas oo ku saabsanaa habka baadhista casriga ah, waxaa ka soo qaybgalay masuuliyiin ka socday wasaarada ,xildhibaan ka mid ah golaha wakiilada gaar ahaana gudida dabagalka hantida qaranka iyo masuuliyiin kale. Waxaana ugu horayn halkaas hadal ka jeediyey xidhiidhiyaha mashruuca PFM-ka Xasan Maxamed faarax ,oo ka waramay mihiimada uu tabarkani u leeyahay ka soo qaybgalayaasha isaga oo kula dardaarmay ka soo qaybgalayaasha in ay ku dabaqaan shaqooyinkooda habka baadhista casriga ah ee lagu tababarayo ,waxaana ka mid ah hadalkiisii “ waa tabararkeeni sadexaad ee aynu u soo qabanqaabino xafiiska hanti dhawrka guud iyo guud ahaanba bahada xisaabaadka ,labadii tabarar ee hore sida Axmed Nuur inoo sheegaywaxaa ay ku saabsanayeen halbeegyada caalamigaa ee lagu diyaariyo xisaabadka ,ta-

babarkan aynu manta u fadhinaana wuxuu ku saabsan yahay halbeegyada caalamiga ah ee lagu baadh warbixinaha xisaabka ,halka aynu u soconaana waxaa weeyey xafiiska hanti dhawrka guud inuu dabaqo halbeegyada caalamiga ah ee looga baahan yahay xafiis hanti dhawr guud inuu dabaqo ama yeesho ,taas oo inoo saamaxaysa mustaqbalka in aynu xubin ka noqono ururada caalamiga ah ee hanti dhawrayaasha caalamiga ah ,saraakiishinan oo ah saraakiishii labadii tabarar ee horana soo qaatay ,mihiimada aad leedihiin waxaa weeyey ama halka aynu doonaynaa in aynu diyaarino dadkii xafiisyadaa ka mid ah ee dabaqi lahaa tabarkaasi .” Waxaa isaguna halkaas ka hadlay hanti dhawraha guud mudane Axmed Yuusuf Dirir oo ka waramay tabararkani inuu daba socdo tababaro hore oo ay soo qaateen hawl-wadeeno ka kala socday wasaarada maaliyada ,xafiiska xisaabadka iyo hantidhawraha guud ee qaranka waxaanu sharaxay in qaranku yeesho hab baadhis casrig ah oo mihiimadisa leh waxaana ka mid ah hadaladiisii “ waxaan filayaa waa tabarkeeni sadexaad intii aynu ku jirnay qorshaheenan dibu habaynta xafiiska hanti dhawrka guud ,laba hore ayaa aynu soo

qaadanay ,maantana waa meelo ka mid ah meelihii aynu u soconay ee intaa loo soo qaadanayey tabarada ,waxa la idiin soo xulayna waxaa weeyan in tabararkan ka faa,i-idaysano kana faaiidayno oo waxtarkiisu uu ka muuqdo shaqa-deena aynu qaranka u hayno ,ujeedada aynu leenahayna waxaa weeyan in aynu hore u socono oo waxtar inaga muuqdo oo wax lagu tanaado aynu soo saaro musqabalka.intiinan waxaa loo soo xulay waxaad u badan tihiin dhalinyaro marka laga reebo shakhsiyaad kooban waxaana ujeedadu tahay in afartanka sano ee soo socoda aad ka faa,iidayn kartaan.” Ugu danbayntina waxaa halkaas hadal ka jeediyey xildhiban Siciid Maxamed Cilmi oo ah gudoomiyaha gudida daba galka hantida qaranka ee golaha wakiilada waxaanu xukumada iyo madaxawaynaha Somaliland ku amaanay habka isu dheeli tiran ee ay u soo gudbiyaan xisaab xidhada maaliyada waxaana ka mid ah hadalkiisii “gudi ahaan wiiga soo socda waxaanu bilaabaynaa dabagalkii xisaab xidhkii 2018kii ,waxaanu halkan uga mahad celinaynaa madaxwaynaha jamuuriyada Somaliland Muuse Biixi Cabdi ,wasaarada maaliyada iyo xafiiska hanti dhawrka guud ee qaranka”.



# Muwaadin Wax ka barro noocyada tacrifadaha

## 1. TUSMADDA BUUGA TACRIIFADDA CASHUURAHA BERRIGGA

### 1.1 CASHUURTA TOOSAN (DIRECT TAX)

#### 1.1.1 CASHUURTA M/MACAASHKA GANACSIGA

S/N	Nooca Cashuurta	Xadiga Cashuurta
1.	Cashuurta M/M/Ganacsiga (Profit Income Tax)	10% (Taxable Income)

#### 1.1.2 CASHUURTA KIRADDA DAARAHA

S/N	Nooca Cashuurta	Xadiga Cashuurta
1	Cashuurta Kirada Daaraha (Rental Tax)	10% ( of the rent amount)

#### 1.1.3 CASHUURTA DAKHLIGA SHAQAALAHA

S/N	Nooca Cashuurta	Xadiga Cashuurta
1	Cashuurta Shaqaalaha (Payroll Tax)	5%

#### 1.1.4 CASHUURTA WADO MARISTA (ROAD TAX)

##### ROAD TAX FEE

NOOCA BAABUURKA	HP/TON	VALUE 1140904	R/D/L 1140905	R/L 1140907	AD/ TAX 1410502	S/TAX 1140902	TOTAL
MINI BUS	10-20seat	24,523	10,000	3,678	490	967	39,658
BUSES	25-30 Seats	29,395	10,000	4,409	588	1,110	45,502
WIXII KA WAYN		38,213	10,000	5,732	764	1,368	56,077
BAJAJ	3-7HP	41,120	10,000	6,168	822	1,453	59,563
GADIIDKA YAR YAR	5-9HP	29,232	80,000	4,385	585	2,855	117,057


GADIIDKA YAR YAR	10-13HP	37,073	80,000	5,561	741	3,084	126,459
MARKII	14HP	61,680	80,000	9,252	1,234	3,804	155,970
WIXII KA WAYN		75,168	80,000	11,275	1,503	4,199	172,145
SUZUKI & 4WD	15-20 HP	62,193	80,000	9,329	1,244	3,819	156,585
DATSUN	20-21 HP	123,360	80,000	18,504	2467	5608	229,939
SURF	21-26 HP	173304	80000	25966	3466	7069	2898385
LAND-CRUSIER	26-30 HP	216026	80000	32404	4321	8319	341070
WIXII KA WAYN	31 HP	250560	80000	37584	5011	9329	382484
GADIIDKA XAMULKA	1 Ton	24493	80000	18504	2467	5608	229939
GADIIDKA XAMULKA	2-3 Ton	39139	80000	5871	783	3145	128938
GADIIDKA XAMULKA	4 Ton	52943	300000	7941	1059	9049	370992
GADIIDKA XAMULKA	5 Ton	63531	300000	9530	1271	9358	383690
GADIIDKA XAMULKA	6 Ton	81850	300000	12278	1637	9894	405659
GADIIDKA XAMULKA	7 Ton	98220	300000	14733	1964	10373	425290
GADIIDKA XAMULKA	8 Ton	116928	300000	17539	2339	10920	447726
GADIIDKA XAMULKA	9 Ton	140314	300000	21047	2806	11604	475771
GADIIDKA XAMULKA	10-11 Ton	154345	300000	23152	3087	12015	492599
GADIIDKA XAMULKA	12 Ton	158990	300000	23152	3180	12150	498169
GADIIDKA XAMULKA	13-18 Ton	190788	300000	28619	3816	13080	536303
GADIIDKA XAMULKA	19-23 Ton	248023	300000	37203	4960	14755	604941
GADIIDKA XAMULKA	24 Ton	341040	300000	51156	6821	17475	716492
WIXII KA WEYN	25 Ton	443352	300000	66503	8867	20468	839190
WIISHASHKAMOBILE CRAIN	10- 20 Ton	116000	300000	17400	2320	10893	446613
WIISHASHKAMOBILE CRAIN	21- 30 Ton	232000	300000	34800	4640	14286	585726
WIISHASHKAMOBILE CRAIN	31- 50 Ton	348000	300000	52200	6960	17680	724840
WIISHASHKAMOBILE CRAIN							

## CASHUURTA WITHHOLDING

S/N	Nooca Cashuurta	Xadiga Cashuurta
1	Cashuurta shaqaalaha Ajaanibka ah	10%

**La socio.....**





## Ma Jirtaa Il-Dhaqaale Oo Muddan In La Maalgashado Maanta Somaliland?



**M**aalgashigu waa mid ka mida nidaamyada lagu kobciyo dhaqaalaha guud iyo ka gaarka Mah ee dal iyo dadkiisa sidaa daradeed dalkeena ma jirtaa il-dhaqaale oo mudan in la maalgashado maanta Somaliland. Jawaabta su'aasha waxaad kaga bogan qormadeenan. Dalkeena Somaliland wuxuu leeyahay fursado badan oo dihin aadna ugu baahan in la maalgashado kuwaas oo ay ka mid yihiin kalluunka iyo milixda ka buuxa badda dheer ee Somaliland oo lagu qiyaasay 850Km2, kana buuxaan khayraad kalluuna oo aad u badan, sidoo kale waxaan maalgalin ku samayn karnaa khayraadka Sibidhka iyo noocyada Rinjiga ee dalkeena kaas oo aan qormadan si gaara uga hadli doonno.

### 1 Fursadaha maalgalined ee Warshada sibidhka ee Berbera

Warashada sibidhka ee Berbera waxay ku taala gobolka Saaxil, gaar ahaan halka ay ku taalo oo uu ka buuxo khayraadka sibidhka iyo noocyada kala duwan ee rinjiga, warshadda sibidhka Berbera waxa la dhisay dabayaaqadii sanadii 1970, waxaana dhismaheda iska kaashaday labada wadan ee Kuuriyada waqooyi iyo dalka Fransiiska, waxayna si

rasmiya shaqada u bilawday bishii march -17 -1987 ayay kishkii ugu horeeyey ee sibidha soo sartay wakhtigaa laga bilaabo waxay soo saari jirtay maalin walba 12000 kiish una dhiganta 600 tan, waxayna qayb libaaxle ka qaadatay dhaqaalihii wadankii laysku odhan jiray Somalia, warashada sibidhka ee Berbera waxaa la xidhay bishii Apr -16 -1988-kii waxaanay

shaqaynin in kabadan 30 sano taas oo ugu wacan tahay burburkii ka soo gaadhay dagaaladii dib dalka loogu xoraynayey, sidoo kale waxa warashadda loo gaystay boob balaadhan oo hantidii iyo qalabkii ay ku shaqaynaysay warashadu taasaan ka dhigtay mid fadhida in ka badan rubuc qarni.



## **Faa'iido intee in leeg ayey u yeelanaysa maalgashiga warshada Sibidhka ee Berbera Somaliland.**

Maalgalinta iyo dib u kicinta warashadda sibidhka ee Berbera waxay Somaliland u leedahay faa'iido aad u baladhan oo dhan walba leh baal aan soo qaadano qaar ka mid ah:

- Maalgalinta warashadda sibidhka berbera: waxay ka qayb qaadanaysaa korodhka dhaqaale ee ku yimaada dhaqaalaha guud Somaliland (GDP).

**12,000 kiish maalintii ×30cisho=360,000kish bishii**

**360,000kish×12 bilood =4,320.000 kish sanadkii**

**4,320.000 kish sanadkii ×\$7 halkii kish maanta = \$30,240,000 faa,iido ah sanadkii**

- Sidoo kale waxay kordhinaysaa dhaqaalaha ay ka helaan dadka shaqeeya (Disposable income) iyo kuwa ka sii baacmushtareeyaba.

- Shaqo abuuris balaadhan oo laga helo maalgalinta warshada sibidhka Berbera iyadoo wakhtigii ay shaqaynaysay ay ka shaqayn jireen shaqaale ka badan 477 shaqaale hoosad ah iyo 60 khuburo ahaa taas oo maanta ay hubaal tahay in ka badan donaan tirade shaqaalaha warashada ka shaqayn doona maadama baahida sibidhka ee dalkeenu aad u badan tahay.

- Waxaa mesha ka baxaya sibidhkii dabada inoogaga iman jiray ee lacagta adag inagaga bixi jirto oo sanadkii ahaa 4,320.000 kish sanadkii ×\$7 halkii kish maanta = \$30,240,000, taa badalkeedana waxaynu inagu dhoofinaynaa xadi sibidha ah oo lacag adagi inaga soo gasho ( export promotion and import substitution)

## **Maxaa la gudboon shacabka Somaliland oo kaashanaya Dawladda si looga faa,iidaysto Sibidhkeena?**

Dhamaan shacabka somaliland oo isugu jira ganacaastada dalkan u dhashay, qurba joogta ku nool daafaha dunidda ee u dhashay Somaliland, ardayda ka qalinjabiyey jamacadaha dalka iyo bulshada oo samaysta iskaashato waxay u haystaan fursado dahabiya inay maalgashadaan warshado badan oo ay ku jirto warshada sibidhka ee berbera oo baahi wayn maanta lo qabo guud ahaan somaliland,

Hadii maalgashadayaal ajaanib ah damcaan in saami ku yeshaan warashada sibidhka ee berbera iyagoo raacaya sharciyada maalgalined ee dawlada Somaliland waxay dawladu hadii ay ku qanacdo in loo bahan yahay maalgalintaa waa la siin karaa.

- Dawlada Somaliland waa in ay saami ku yelataa warashada sibidhka ee Berbera diyaarisana sharci yadii lagu hagi lahaa nidaamka maamul ee warashada sibidhka ee berbera.

- Dawladu waxayku dadalaysaa samayntaSharciyagii Maalgashiga Gudaha

- Dawlada Somaliland waxay ku dadalaysaa in ay samayso sharciyada kala xadaynta ganacsiga

- Somaliland.

- Dawlada Somaliland marwalba waxay ahmiyada siinaysaa dhiirigalinaysa wax soosaarka dalka sidaa daradeed sibidhkii dabada inooga yimaada waxaa laga horaysinayaa kan dalkkeena taas oo lagu dhiiri gali-nayo sibidhka dalka.

## Wax ka Baro Buuga Miisaniyadda Muwaadinka Somaliland 2020

### SIDEE DAWLADDU WAX U KHARASHGAREYSAA SIDEESE UGU DHIGANTAA 2019?

Hantida dawladdu uga baahan tahay hirgelinta qorshayaasheeda sannadka 2020, waxa uu ka imanayaa cashuuraha iyo ilaha dakhliga ee kala ah:


Il Dakhli	SLSH in 2019	SLSH in 2020	% Faraqa	% Wadarta
Cashuuraha dakhliga iyo macaasha-macaashka	40,952,414,628	45,366,371,939	10.78%	2.22%
Cashuuraha mushahaaroyinka iyo shaqaalaha	40,952,414,628	93,307,587,842	-16.08%	4.56%
Cashuuraha agabka iyo adeegyada	492,425,922,802	557,278,424,539	13.17%	27.24%
Cashuurta ganacsiga caalamiga ah	809,846,028,537	989,541,311,981	22.19%	48.36%
Cashuuraha & dakhliyada kale	327,741,967,859	360,506,303,700	10.00%	17.62%
<b>Wadarta Guud ee Dakhliga Qaranka</b>	<b>1,782,154,460,000</b>	<b>2,046,000,000,000</b>	<b>14.80%</b>	<b>100.00%</b>
Dawlada Hoose	255,490,228,023	326,748,574,181	27.89%	
Wakaaladaha madaxa bannaan	160,756,179,150	242,036,387,917	50.56%	
Deeqaha Caalamiga ah	135,919,596,078	136,519,918,000	0.44%	
<b>Khayraadka/Hantida Guud ee Dawladda</b>	<b>2,334,320,463,251</b>	<b>2,751,304,880,098</b>	<b>17.86%</b>	

### SIDEE DAWLADDU UGU KALA QOONDAYSA KHAYRAADKA WADAAGAYAASHA KALA DUWAN?

Miisaaniyadda 2020 waxa ay ugu kala qoondaysay qaybaha kala duwan sida uu kala-mudnaanta u siiyey Qorshaha Horumarinta qaranka II (NDP II)

QAYBTA	SLSH in 2019	SLSH in 2020	% faraaqa	Qoondada Kharashgaraynta guud
<b>Ammaanka/Nabadgelyada</b>	657,025,835,791	709,512,317,712	7.99%	34.68%
<b>Maamulka</b>	342,266,545,784	391,938,588,527	14.51%	19.16%
<b>Dhaqaalaha</b>	277,048,930,634	344,344,067,555	24.29%	16.83%
<b>Waxbarashada</b>	150,270,542,188	196,847,233,514	31.00%	9.62%
<b>Caafimaadka</b>	90,268,550,602	96,528,054,269	6.93%	4.72%
<b>Kale</b>	85,742,250,520	96,009,113,469	11.97%	4.69%
<b>Kaabayaasha</b>	84,151,200,498	91,301,799,108	8.50%	4.46%
<b>Waxsoosaarka</b>	46,411,928,957	54,254,418,603	16.90%	2.65%
<b>Biyaha &amp; Faryodhawrka</b>	17,529,490,644	28,819,080,788	64.40%	1.41%
<b>Deegaanka</b>	23,569,007,846	25,371,489,002	7.65%	1.24%
<b>Tamarta</b>	7,870,176,536	11,073,837,453	40.71%	0.54%
	<b>1,782,154,460,000</b>	<b>2,046,000,000,000</b>	<b>14.80%</b>	<b>100.00%</b>





**SIDEE DAWLADDU U KHARASHGARAYSAA MIISAANIYADEEDA MARKA LOO EEGO QIIMAHA MADAXYADA?**

KHARASHKA	2019	2020	% Faraqa	% Miisaaniyadda
Mushaharka Shaqaalaha	922,366,729,717	991,159,240,274	7.46%	48.44%
Kharshka Hawl-fulinta	463,139,075,825	535,720,823,610	15.67%	26.18%
Mashaariicda Dawladda oo ay ku jiraan hantida la taaban karo (physical)	229,415,263,658	330,430,545,316	44.03%	16.16%
Deynta	61,200,000,000	75,000,000,000	22.55%	3.67%
Lama-filaanka & Sanduuqa Kaydka Qaranka	59,800,000,000	66,100,000,000	10.54%	3.23%
Kabista	46,233,390,800	47,579,390,800	2.91%	2.33%
<b>Wadar</b>	<b>1,782,154,460,000</b>	<b>2,046,000,000,000</b>	<b>14.80%</b>	<b>100%</b>

**WAA MAXAY KALA-MUDNAANSIINTA KHARASH-GALKA EE 2020?**

**AMMAANKA/NABADGELYADA**

Adkaynta nabadgelyada muwaadiniinta Somaliland waxa ay ka mid tahay goobaha mudnaanisiinta u horraysa u leh dawladda. Miisaaniyadda 2020, iyada oo ka dhabaynaysa aragtidan, waxa ay kor u qaadaysa noloshu iyo qalabka Ciidamada Ammaanka. Waxa loo qoondeeyey qaybta ammaanka SIShs 709.5 bilyan, oo u dhiganta 34.6% Miisaaniyadda Qaranka, kana sarraysa 8% qoon-dadii 2019.

**La soco.....**

## CASHUURTA LA REEBAYO (Withholding tax)

Cashuurta la reebayo (Withholding tax) Waa Cashuurta ku waajibtay dadka aan deganayn Dalka balse dakhli aan mushahar shaqaale ahayn, ka hela Gudaha Xuduuda Dalka JSL si kasta haku helo'e; Hadaynu si kale u dhigno Cashuurtani waxay qayb ka tahay Cashuurta dakhliga ee loo yaqaanao badanaa Cashuurta Macaashmacaashka Ganacsiga oo ah qaybta Cashuuraha Toosan. Cashuurtani waxa waajibinaya Cutubka 2-aad qaybtiisa aad iyo 11 aad ee Xeerka Dakhliga guud Cashuuraha Somaliland Xeer Lr 72/2016 Masuuliyadda Ka reebiista Cashuurtaas waxa Xeerku ku waajibinayaa inuu ka reebo waa Cidkast oo ka ka wakiilka ah ama Xidhiidh macaamilka dhaxeeyo ajaanibka Cashuurta ku waajibtay Ciddaasi ayaa Xeerku u yaqaanaa Wakiil Cashuur reebe. Wakiil Cashuur Reebe:- Waa Qofkasta oo shaqsi ah ama qof sharciya sida Shirkad gaar loo leeyahay, Dawli , Hayadaha samafal caalami ama Muxali; dhamaan dadkaasi haday la macaamilaan dadka ajaanibka ee aan deganayn dalka ee dakhli Cashuurgal ah ka hela dalka Gudahiisa Waa Wakiil Cashuur reebe. Cashuurtan waxalabixinayaabile oo ah bishaxigtabisha Cashuurta waajibtay ama shan iyo tobanka cisho ee xiga xiliga dhamaadka hawsha ama la helay dakhligaas. Haddii Wakiilka Cashuur reebe ku guuldarays-to inuu ka jaro Cashuurta ku waajibtay dadka aan deganayn dalka ; isaga laftiisa ayay dusha ka fuulaysaa Cashuurtii waajibtay iyo ganaax ka dhashay fulin la'aanta masuuliyadaas. Waxa aanu halkan hoose ku soo Gudbinaynaa Noocyada Cashuurta la reebayo iyo tacriiftooda:-

1. Cashuurta laga reebayo ee ku waajibtay dadka aan dalka deganayni ee dakhli Cashuurgal ah ka hela dalka sida :- Dakhliga Saami Faaiido, Royalty, kirooyin, Bixin khayradka dabiici ah , khidmada maamulka iyo IWM; waxa laga Cashuurayaa 10% oo ku dhacaya dakhliga Guud.

2. Cashuurta laga reebayo ee ku waajibtay dadka aan dalka deganayni ee dakhli Cashuurgal ah ka hela dalka sida:- Dakhliga adeega qandaraasyada iyo xirfadlayaasha aqooneed, la taliyayaasha ama heshiishkasta khidmadeed oo aan ahayn heshiish Cashuurtoodu waa 10% oo ku dhacaya qiimaha guud.

3. Cashuurta laga reebayo ee ku waajibtay dadka aan dalka deganayni ee dakhli Cashuurgalah ka hela dalka sida Dakhliga madadaaliyayaasha iyo ciyaartoyga aan dalka deganayn Cashuurta waa 10% qiimaha guud dakhligaas.

4. Cashuurta laga reebayo ee ku waajibtay dadka aan dalka deganayni ee dakhli Cashuurgal ah ka hela dalka sida Dakhliga Gaadiidka Badda , Cirka iyo dhulka Cashuurta waa 10% Qiimaha guud.

Noqo Wakiil cashuur bixiye oo ka bax masuuliyada kaa saaran ka reebiista Cashuurta dadka aan dalka deganayn ee dakhli ka hela gudaha dalka si aan u noqoto wakiil cashuur reebe wanaagsan laguguna abaal marin doono.

ALLAA

MAHAD

LEH.



## Nuxurka Socdaal Shaqo Oo Wasiirka Iyo Agaasimaha Guud Ee Wasaaradda Maaliyadda Ku Tageen Xarumaha Dakhliga Ee Magaaladda Berbera



**B**erbera 28,03, 2020 (HWM) - Wasiirka wasaarada horumarinta maaliyada Dr Sacad Cali Shire iyo Agaasimaha guud ee wasaaradda oo safar shaqo ku tagay xarunta gobolka Saaxil ee Berbera 1-dii February 2020 ayaa kulamo halkaasi kula yeeshay maamulka iyo shaqaalaha kaastamka magaalada Berbera, iyagoo sidoo kale koormeer ku soo maray xafiisyada uu kaastamku ku leeyahay dekada Berbera iyo badeecadaha kala duwan ee ka soo dega iyo kuwa ka dhoofaya dekada. Waxa halkaasi wasiirka iyo agaasinmaha guud warbixin ku siiyey maamulaha caastamka Berbera Cabdiraxman Ciro iyo sidoo kale shaqaalaha iyo hawl-wadeenada kaastamka Berbera.

Wasiirku socdaal dheer iyo xog urursi ka dib waxaa uu kulan la qaatay qaar ka mid ah ganacsatada wax kala soo degta dekada wayn ee Berbera, isla markaana waxa uu Wasiirku la kulmay madaxda Shirkadda DP World iyo maamulka dekada Berbera. Shirarkaasi dhawrka ka dib waxa warbaahinta halkaasi kula hadlay, tafaasiilna ka bixiyey ujeedada socdaalkooda wasiir Sacad Cali Shire iyo Agaasimaha guud ee wasaarada horumarinta maaliyadda Maxamed Cabdi Gurxan iyo maareeye ku xigeenka dekada Berbera Cabdi Cabdilahi Xasan Mataan, waxaanu yidhi maareeye ku xigeenku “Maanta ujeedada shirku waxaa ay ahayd in lala kulmo daneeyayaasha dekada (Berbera

stake holders), xaga xukuumadda iyo xaga dadka isticimaalaba, waxaa nala joogay maamulilhi iyo shaqaalhi caastamka , wasaaradii ganacsiga , qoladii tayada (quality control commission ), ganacsatadii iyo madaxdii shirkadda DP World oo iyaduna shirka nala gashay, waxaa intayadaasiba aanu ka wada hadlaynay sidii loo hagaajin lahaa ee loo dardargalin lahaa adeega ay bixiso dekada Berbera. Dekedu waa adeeg bixiye wasaaradaha ay khuseysaana adeegaas ayaa ay ka shaqeeyaan, waxaa sida aynu la socono Berbera ay tahay goobta ugu mihiimsan ee ganacsiga Somaliland-na uu ka soo galo, dakhkiga Somaliland waa meelaha ugu mudan ee uu ka soo galo.”

Wasiirka wasaarada horumarinta maaliyadda Dr Sacad Cali shire oo isaguna halkaasi ka hadlay ayaa waxaa uu sheegay in socdaalkoodani uu la xidhiidho sidii ay u dardargalin lahaayeen hawlaha kastamka Berbera, sidoo kalana ay u eegi lahaayeen ganacsatada wadanka iyo sida ay ula shaqeeyaan caalamiyada dalka, waxaana ka mid ah hadaladiisi “Waxaanu ku nimi aniga iyo agaa-simaha guud ee wasaarada horumarinta maaliyada socdaal shaqo, socdaalkaasi wuxuu leeyahay laba ujeedo, ujeedo waxaa weeyi inaanu samayno kormeer xafiisyada kastamka Berbera iyo inaanu la kulano daneeyayaasha dekada inta isticmaasha iyo inta u adeegtaba, kormeerkaas aanu soo marnay si fiican ayaa ay

shaqadu u socotaa, xaga dakhliga halkii loogu talo galay ayaa uu marayaa marka loo eego bishii sanadkii hore ee January wuu ka sareeyaa, dhinaca kale marka ka hadlo daneeyayaasha wixii aanu is nidhi sidii uu sheegay maareeye ku xigeenkuna, waxaanu isugu nimi afar qolo ganacsatada oo isticmaasha dekada, anaga oo ka socona Kastamka iyo wasaaradda maaliyadda, qoladda DPworld, wasaarada ganacsiga iyo ha’ayadda dhawrida tayada oo shirka nagu wehelinaysay, waxyaabo badan ayaa aanu isla falaqaynay sidii kor loogu qaadi lahaa adeega dekada, waayo dekedeen waxa ay ka mid tahay dekedaha waaweyn ee gobolka, dekedeen waxa aynu doonaynaa in had iyo jeer ay ganacsatadu doorato, waxaanay

runtii muujiyeen ganacsatadu in ay ku qanacsan yihiin adeega imika loo sameeyo, waxaase ay tilmaameen arimo yaryar oo jira oo iyaga laftooda loo baahanyahay, kuwaas oo ay ka mid yihiin xafiisyada kastamka oo koobkoo-ban waayo dekedi way balaadhatay ,waxaa kale oo ay noo soo jeediyeen habraaca la raaco in la fududeyo marka alaab lagala baxayo dekada ,waxaa kale oo ay noo soo jeediyeen in gudi la sameeyo isu yimaado sadexdii biloodba mar gudidaasina noqoto guddi farsamo oo ka wada xaajota waxyaabaha loo baahanyahay sidii loo qabanlaaha waxaanu kulankaa-si noogu dhamaaday si aad iyo aad u qiimo badan oo wado tashi ah”.





## Saamaynta Taban ee Caaquba Covid-19 ku Yeeshay Dhaqaalaha Dunida, Doorka Aqoonyahan-ka iyo Faa'idada Yagleelidii Ururka Dhaqaala-yahan ka Somaliland.



Hargeisa 28,03, 2020 (WHM) - Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL iyadoo ka duulaysa waajibbaad-ka shaqo ee ay u idman tahay, gaar ahaan door-keeda ah raadinta, soo bandhigida, iyo taxliilinta arimaha dhaqaalaha wadanka, haduu yahay mid gaar-ka ah (Private Sector) iyo mid ka umada ka dhaxeeyaba (Public Sector), waxay 19-kii bishan Maarso soo qaban-qaabisay munaasibad meeqaam-keedu sareeyey, taas oo lagaga wada xaajoonayey seddex ujeedo oo is huwan, sida saameynta taban ee uu dhaqaalaha dunidda guud ahaan, iyo gaar ahaan kan Somaliland ee curdin-ka ah ku yeeshay Caabuqan dunidda wareeriyeyee Covid-19. Waxa isla madasha lagu gorfeyey door-ka uu ka ciyaari karo dhaqaalayaan-ka wadanku, iyadoo isla goobtaas lagu yagleelay urur-ka dhaqaalayaan-ka S/land, magiciisana loo soo gaabiyey SEA (Somaliland Economists Association).

Munaasibada oo ay soo diyaarsay Waaxda Wasaaradda ugu qaabilsan hawlaha Dhaqaalaha iyo Tiraakoob-ka, ayaa qaadatay mudo dheer iyadoo lagu dheeraaday lafa gurka arimaha aan sare ku xusnay. Hadaba madasha oo ahayd mid hab-maamuuseedka iyo miisaan-keedaba lahayd, waxa kasoo qayb galay isla markaana daah-furay Wasiirka wasaaradda Dr.Sacad Cali Shire, tiro aqoonyahana, gaar ahaan kuwooda ehelka u ah dhaqaalaha, Rugta Ganacsatada Somaliland (S/land Chamber of Commerce), Saraakiil ka socotay Wasaaradda Maaliyadda, iyo Bangiga Dhexe, Khubaro kala duwan, iyo waliba dadweyne kale. Waxa xusid mudan in kulankani ahaa mid loo balansanaa, kaas oo daba socday mid kal-hore 15-kii October 2019-kii lagu qabtay Jaamacada Hargeisa. Balse agendaha waxa kusoo kordhay mid kan ku saabsanaa Caabuqa Covid-19 iyo saamaynta

dhaqaale ee uu dunida ku yeeshay. Wasiir Dr.Sacad Cali shire oo ugu horayn ka hadlay furitaan-ka shirka wuxuu sharaxaad, iyo tusaalayn qoto dheer ka bixiyey dhaqaalaha, iyo muhiimada uu noloshu aadanaha u leeyahay. Hadalka furitaanka ee Wasiirka ka dib, Waaxda Dhaqaalaha Guud iyo Tirokoobka ayaa soo jeedisay xog kooban oo ay kasoo diyaarisay saamaynta taban ee Covid-19 ku yeeshay dhaqaalaha dunida. Xogtaas oo afka Ingiriisida ku qornayd waxa iyadoo faahfaahsan laga heli karaa shabakada Wasaaradda ee SImof.org, khaandiisa daabacaadaha (Publications). Intaa ka dib waxaa xubno la soo xulay oo dhaqaale-yahano iyo ganacsato ahiba ay ka doodeen oo falanqeyeen sida uu xanuunkani dhaqaalaha dunida iyo kan Soomaaliland ba uu u saameeyay.

Waxaynu soo qaadan karnaa hadalkii aqoonyahan marna ah ganacsade ka socda rugta ganacsiga Soomaaliland Dr. Farxaan Liibaan Axmed, fariintas oo dalka iyo dadkaba muhiim u ahayd si culuyska iyo werwerka ay ka qabaan in cuntooyinka iyo dawooyinkuba yaraadaan, isagoo arintaa ka hadlayana wuxuu sheegay ganacsadaahaasi in alaabtii iyo dawooyinkii la soo rari jiray ee iman jirtay Somaliland ay sidoodii yihiin oo aanay ilaa hadda waxba iska bedelin wax bulshadu ka werwertaana aanay jirin. Wuxuu sheegay in bishan Maarso ee sanadkan 2020 oo keliya ilaa 6,000 oo kontiinar ay soo gaadheen dekedda Berbera ilaa 5,000 oo kontiinar oo kalena dhexda ku soo jiraan wadar ahaanna ay noqonayaan 11,000 oo kontiinar. Marka la barbar dhigo xogta uu sheegay ganacsade Farxaan xogta iyo tiro-koobka ay Wasaaraddu hore u haysay ee bisha March 2018 iyo 2019, aanay xogtani ka hoosaynin ee ay ka sarayso xogahaa sanaddada hore, waxaanay muujinaysaa in aan saddex-biloodkani xagga soo degidda alaabooyinka iyo dawooyinku waxba iska bedelin. Wuxuu ganacsaduhu kula taliyay dawladda in la xakameeyo in ay debedda u baxdo alaabooyinka daruuriga ah sida raashinka iyo daawooyinka si aanay dalka uga dhicin raashin iyo dawooyin yaraan inta xaaladdan lagu jiro. Sidoo kalena si hawshaa dhaqaalaha dalka wax looga qabto waxaa madasha shirka lagaga dhawaaqay in markale dib loo kiciyay Ururkii Dhaqaale-yahanka Somaliland (Somaliland Economists Association, SEA). Ururkan ayaa hore u jiray oo muddo ka hor ayaa la sameeyay hase yeeshee, uu fadhii-stay oo sidii la doonayay uma uu shaqayn duruufo soo wajahay awgood.

Ururku waa urur madaxbanaan oo aan dawli ahayn. Ururkani waa urur dalku u baahan yahay gaar ahaanna xagga dhaqaalaha. Ururku wuxuu qayb libaax ka qaadan doonaa sidii dhaqaalaha dalka loo kobcin lahaa ee loo horumarin lahaa. Hawshan ururka abaabuliddiisa iyo dib u kicintiisa waxaa loo saaray guddi madaxbanaan oo farsamo iyo qaban qaabo oo muddo shirk ka hor ku hawlanayd. Waxay guddidii dib u soo sameeyeen xeerkii, qaab-dhismeedkii, istaraatiijiyadda hal sano ururku ku shaqayn doono iyo guddi ka kooban sagaal xubnood oo ururku yeelan doono. Guddidaasi waxay iska dhexdoorteen guddooye iyo xog-haye uu yeelan doono ururku oo qabta hawlaha joogtada ee ururka. Waxaa gudoomiye loo doortay Dr. Adam Ismaaciil Xasan halka xog-hayaha ururkana loo doortay Dr. Maxmed Cumar Cismaan. Shirweynuhu sidaa ku ayiday. Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda Somaliland Dr. Sacad Cali Shire oo gabagabadii shirka ka hadlay, ayaa waxa dadweyanaha u sheegay hadal aad loogu diirsaday, isla markaana xiligiisa yimid, kaas oo u dhignaa sidan: “Shalay waxaanu la kulanay ganacsatada, gaar ahaan kuwa ka ganacsada daawooyinka, cuntada, iyo shidaalka waa sedex shay ee istaraatiijik ah (Daruuriga ah), waxa kagoonu la kulanay Wasiirka Beeraha oo guddidana ka mida iyo Gudoomiyaha Hay’ada Aafooyinka waa meesha kaydku (Reserve) inoo yaalo. Nasiib wanaag waxay ganacsatada, Maareeyaha Aafooyinka iyo Wasiirka Beeraha ay noo sheegeen oo ay nagu ganciyeen, inaan wax cabsi ahi aanay jirin, taas oo laga qabo cunto yaraan, iyagoo noo sheegay inay taalo isla markaana u soo socoto tu kale, sidaa daraadeed sabab dadka loo khalkhal galin karaa aanay jirin”. Wasiir Dr. Sacad ayaa goobta kaga

dhawaaqay in ka wasaarad ahaan ay cashuur-dhaaf u samaynayaa dhamaan agabka iyo daawooyinka lagula tacaalo ka hortaga cudurkan, islamarkaasna ay u astayn doonto Wasaaraddu Qoondo/Miisaaniyad gaara. Halka mudada lagu jiro xaalada degdega ahna ay ku shaqaynayaan siyaasad ku salaysan Gunti-giijis ah (Financial Austerity), sidaa darteed gabi ahaanba ay joojin doonaan kharashaad-ka aan daruuriga ahayn. Guntii iyo gunaanad-kii waxa shaki la’aan ah in Caabuqa Covid-19 uu la dagay dhaqaalaha dunida, sida warbaahinta iyo cilmi baadhiso hordhici sheegayaana wuxuu si gaara dhaawac ba’an u gaystay qaybaha “dalxiiska, shirkadaha duulimaad-yada, wax-soosaarka beeraha iyo wax-soosaarka shiidaalka”. Somaliland oo ah dal yar, oo curdin ah, isla markaana aan wali aqoonsi buuxa ka helin dunida, dhaqaalihisuna yahay mid da’ iyo duruufba la wadaago wadankiisa kama bad qabo culayska caalamiga ah ee uu keenay Caabuqa Covid-19.

=Wabilaahi

Tawfiq=





